

XEERKA n. 119 rep.

MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA
MAAREEYAHAD

MARKI UU ARKAY wareegtada madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 9 diseembar 1952, n. 2357;

MARKI UU ARKAY D. A. n. 82 ee 27 maajo 1952 oo ku saabsan in la sameeyo dowrad tababar macallinnimo;

LANA TIXGELIYAY fursadda u sameynta dugsi aqoon sare oo nadaamsan oo soo saara macallimiinta degaanka;

MARKI UU GHEGEYSTAY Guddiga dhexe ee dugsiyada fadhlgoodii 27 luglio 1953;

WUXUU XEEREEYAY:

Qod.1.

Waa la tirtiray XEER n. 82 ee maajo 27, 1952.

Qod. 2.

Sanadkii 1953-54 waxaa Soomaaliya laga asaasay machad 3-sannadle ah ee aqoonta horumarsan.

Qod. 3.

Machadka aqoonta sare waxaa lagu galayaa shahaaddada dugsiga hoose/dhexe.

Qod. 4.

Si ku meelgaar ah, iyo xaalad kasta aan ka dambayn sannad dugsiyeedka 1954-1955, dhallinta, in kasta oo aaney haysan shahaadada lagu xusay qodobka hore, laakiin caddayn kara sannad dugsiyeedka ugu horreeyay, oo ay muujiyaan awoodid iyada oo loo marayo gaar ahaan imtixaanka gelitaanka, waa lagu qoraa marka ay caddato in ay si wanaagsan ula socon karaan dowrooyinka Machadka laftiisa.

Qod. 5.

Kuwa ku guuleysta imtixaanka kama dambeysta ah ee Machadka aqoonta sare ayaa heli doona shahaaddada awoodidda ee barannimo dugsiyada hoose ee Soomaaliya, ama magaca "Macalin dugsi hoose".

Qod. 6.

Wareegtooyin xiga ayaa lagu sheegi doonaa xeerar la xiriira nadaaminta, barnaamijyada waxbaridda iyo kuwa kale oo leh isku ururin iyo kuwa dhameystirka ah ee ku saabsan machadka aqoonta sare ee aan kor ku soo sheegnay.

Qod. 7.

Kharashaadka agabka, qalabka waxbaridda iyo ka shaqeysiinta machadka aqoonta sare, waxa miisaami doonaa qodobka 64aad ee miisaaniyadda sannad maaliyadeedka min 1 luulyo 1953 - 31 disember 1954 iyo qodobbada la midka ah ee sannad maaliyeedyada xiga.

Muqdisho, 29 luulyo 1953.

**MAAREEYE
E. Martino**

Arkay diwaangelinta n. 38 ee R. D.

4 agoosto 1953.